



Allaha naftaydu gacantiisa ku jirtaan ku dhaartee salaadaydaa u ekaansho badan salaadii Rasuulka scw salaaddiisuna sidaas ayey ahayd ilaa uu aduunka ka tagay

Abii Hureyra Allaha ka raali ahaade, wuxuu yiri: Rasuulku scw salaad walba wuu takbiirsan jiray tan faralka ah iyo tan sunahaba, ramadaanka iyo qayrkiba, wuuna takbiirsan jiray markuu kacayo, markuu rukuucayo, wuxuuna dhihi jiray: samic Allahu liman xamidah, ka dib wuxuu dhihi jiray: rabanaa walakal xamdu, intuuna sujuudin, ka dibna wuxuu dhihi jiray: Allahu akbar, markuu u sii hoobanayo sujuuda, ka dib wuu takbiirsan jiray markuu madaxiisa sujuuda ka oo qaadayo, ka dib wuu takbiirsan jiray markuu fadhiga rakcada labaad ka kacayo, sidaasuu ku samaynayey rakcad walba, ilaa uu salaada dhameeyo, wuxuu yiri-abuu Muusa- markuu tagayey: Allaha naftaydu gacantiisa ku jirtaan ku dhaartee salaadaydaa u ekaansho badan salaadii Rasuulka scw salaaddiisuna sidaas ayey ahayd ilaa uu aduunka ka tagay.

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Abuu Hurayra waxuu wariyey-Allaha ka raalli ahaadee-qeyb ka mida sifooyinkii/qaabkii salaadda Nabiga -naxariis iyo nabadi korkiiye-waxuuna ka warramay inuu Nabigu markuu salaadda isku taago takbiiratul-ixraamka ku bilaabi, haddana uu takbiiran jiray markuu rukuucayo, markuu sujuudayo, markuu sujuudda ka toosayo, markuu sujuudda labaad sujuudayo, markuu kasoo toosayo sujuudda labaad, markuu ka kacayo fadhiga labada rakcadood ee hore, salaadaha maqribka iyo kuwa afarlayda ah, sidaabuuna samayn jiray salaadda oo dhan, ilaa uu gudanaayo salaadda, marka uu rukuucda ka toosayana waxuu dhihi jiray: samicallahu liman xamidah (Alle wuu maqlaa midka ku xamdiya, haddana waxuu dhahayey isagoo taagan: Rabbanaa lakal-xamdu (Rabbigayoow aday mahadi kuu sugnaatay). Ka dib wuxuu oronayey Abuu Hureyra markuu salaada ka baxay: Allaha naftaydu gacantiisa ku jirtaan ku dhaartee, salaadaydaa ugu ekaansho badan salaadii Rasuulka scw sidaa ayey ahayd sifada salaaddiisu ilaa uu dunida ka tagay.

النجاة الخيرية
ALNAJAT CHARITY

